

Codeynta marka aan la haysan cinwaan joogto ah



Meel kasta oo hoy kuu ah, mar kasta codkaagu waa muhiim

Caddeynta deggenaanshaha

Waxaad u baahan tahay cinwaan inaad hadda haysato (tusaale xarun aad si ku meel gaar ku hoyato, guri ay leeyihiin dad aad saaxiib tihiin, bannaanka iwm.) si aad isugu diiwaan geliso in aad wax doorato.

Cinwaanka bannaanka ah, ku qor qeybta isgoysyada waddada iyo faahfaahinta meesha aad seexato (tusaale SW geeska Loring Park oo u dhow isgoyska Hennepin Ave. iyo Oak Grove St.)

Maalinta doorashada waxaad xarunta keeni kartaa shaqaale ama qof ah codbixiye ka diiwaan gashan xaafaddaada oo lagu dhaariyo in uu shakhsi ahaan aqoon kuu leeyahay adiga iyo meesha aad ku nooshahay. Nidaamkaas waxaa loo yaqaan 'dammaanadda cod-bixiyaha'.

Codkaaga ayaa laga yaabaa in muran ka yimaado goobta doorashada, laakiin weli xaq u leedahay in aad codeyso.

Haddii aan cinwaankaaga la xaqiijin karin, waxaa laga yaabaa in "su'aalo lagugu weydiyo goobta doorashada". Mar kasta waad codeyn kartaa. Garsooreyaasha doorashada ee goobta codbixinta ayaa kugu dhaarin doona goobtaada deggenaanshaha.

Sameyso qorshe aad ku codeyso.

Goobaha codbixinta badanaa waxa ay furan yihiin 7-da subaxnimo ilaa 8-da fiidnimo.

Marba haddii aad ku jirto safka cod-bixiyeyaasha 8-da fiidnimo, waad codeyn kartaa, xitaa haddii aadan soo gaarin miiska codeynta ilaa 8-da fiidnimo ka dib.

Ma rabtaa in lagaa caawiyo diiwaan gelinta si aad u codeyso?

Maktabadda xaafaadda ayaad caawimaad ka heleysaa.

Ama booqo, mvotes.org

Ma rabtaa in aad hesho goobta aad ku codeyneyso?

Booqo, pollfinder.sos.state.mn.us

Ma codeyn karaa...

Haddii la igu soo oogay ama la igu xukumay dambi yar ama dambi xoogaa yar weyn?

HAA

Haddii aan ku jiro xabsi, laakiin aan hadda xukunkeygu ahayn dambi aad u weyn?

HAA

Haddii la igu soo oogay dambi aad u weyn, laakiin aan weli la i xukumin?

HAA

Haddii dambi aan qirtay aan la ii qorin oo ciqaabtana la ii fududeeyo?

HAA

Haddii aan soo dhammeysto gebi ahaan xukun ah dembi weyn ee gobol kale?

HAA

Haddii aan soo dhammeystay gebi ahaan xukunka dambi weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran?

HAA

Haddii aan hadda xabsi ugu jiro dembi weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran?

MAYA

Haddii la igala noqdo dambi aan qirtay oo aan la ii qorin oo ciqaabtana la iga fududeeyey oo hadda xabsi la i dhigay?

MAYA



hennepin.us/elections